Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan



# Soomaaliland cidbaa u maqan , ceelna waa u qodan yahay



## Ardayda Soomaaliland
## Iyo Wadanka Maleeshiya

*Janaayo, 2009*
*Mareegta Farshaxan*



Sooyaalaka taariikheed wuxuu sugayaa in xornimada markii la qaatay ka dib, yididiiladii dadku u qabay inay horumar gaadhi doonaan ,aanay waliba dawladihii shicibka ahaa ku guuldaraysteen xaqiijinta rajadii bulsha weynta soomaaliyeed ay dadkii ka hayaameen dalka aadna dibada loogu baxey xillliyadii u dhaxeysay 1966kii ilaa 1988kii .waxaa xiliyadaa taariikhda maanseed ku sugay abwaanka weyn ee Cabdi Aadan "Qays" oo aad uga dayriyey xaalada nololeed,siyaasadeed ,dhaqaale iwm ee dalku markaa marayey ,isagoo dareenka bulshada ka waramayana wuxuu maanso sooyaalka taariikhda gashay ku yidhi:

*Inta uu dalkaygii dacar iyo gadhoodh yahay*
*Dahab la gaadhinee danti ay abaar tahay*
*Dagalada shisheeyaha looga doono baahida*
*Didibkiyo buulkiyo daalka dhawran maayoo*
*Dugsan maayee ciilkee dibadahaan u kacayaa*
Cabdi Qays

Bishii May 18keedii ee gu'gii 1991kii ayaa Somaliland ka xuubsiibatey wadaagii wadankii Soomaliya la odhan jiray .Ilaa xiligaa waxay Soomaliland u hawl gashay

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

siday nolosha dalka kor ugu qaadi lahaayeen dhinac kasta guulo la taaban karana Ilaahay waa u suurtogaliyey inay hantaan. Hadaba dhinaca waxbarashada, waxaa dalka ku yaala dhawr jaamicadood, dugsiyada sare, dhexe iyo hoose tirsiimo sare kor bay u dhaafeen. Dadka dibada wax ku soo bartay ee dalka ku noqday baana suurtogaliyey inay waxbarashada dalku kor u kacdo. Sidaa darteed bahda mareegta farshaxan waxay ummada la wadaagi doontaa qoraalo ku saabsan aqoonyahanada dalka u maqan iyo dalalka ay kala joogaan.

Waxaa isa soo taraya hayaanka waxbarashada ee ardayda reer Somaliland ku tagayaan wadamo ka fog halkii ay ku dhasheen, isla socdaakaas markii hore waxa ay ku tagi jireen waddamada Hindiya, Bakistaan, Masar, Kiiniya, Itoobiya, Yugandha, Koonfur Africa, Suudaan,Imaaradka Carabta ,iwm. Balse waxaa dalalkaa ku darsamay wadanka Maleeshiya. Ardaydii ugu horraysay ee Maleeshiya timaadaa waxay ay ku beegnayd 1997[kii], markaas oo ay ardaydu fiisayaasha ay ku imanayaan ay uga soo wareegi jireen dhanka Tayland,.Marka ay Tayland ka soo wareegaan badankoodu waxa ay gali jireen Jaamacadda Universty Islamic In Maleeshiya (UIA), Jaamacaddaas oo badankooda deeq waxabarasho siin jirtay ardayda, dhaqaalaha Ku baxayana ay bixin jirtay Dawladda Sucuudiga .Waxaa fursadahaas barigaas ka faa'iidaystay arday badan oo reer Somaliland ah, oo hayaankaas ku yimi ,haddana qaarkood ka shaqeeyaan wadamada Imaaradka carabta,Yuruba, iyo waliba dalkii hooyo. Waxbarashada ardaydaasi barigaas waxay ka gaadheen Ilaa darajada Master, taasina waa sababta u sahashay inay shaqooyin fiican helaan.



Qaar ka mid Ah ardayda wax ka barata Maleeshiya iyo qaar ka shaqeeyaba

Waddanka Maleeshiya waxa uu ku yaalaa koofurta Aasiya. Maleeshiya waa waddan ku fiican dalxiiska, waxaanay leedahay xeebo wanaagsan iyo cimilo ku haboon.Dhulka Maleeshiya wuxuu ka kooban yahay laba qeybood oo la kala yidhaahdo Peninsular Maleeshiya iyo Semenanjung Maleeshiya ,waxaanu ka kooban yahay 14 gobol oo ay ku jiraan laba Gobol (states)oo la kala yidhaahdo

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Sabah iyo Sarawak, kuna dhex yaala dhulka la yidhaahdo Borneo .Maleeshiya waa wadan ku dhaqma habka Fedaraal-ka ah oo ka kooban 11 gobol(states) and saddex federal territories. Maleeshiya waxaa Ku nool qowmiyaddo kala duwan, diimo kala duwana kala aaminsan ,lehna afaf kala duwan, sida qoowmiyadda Malay( dadka dhulka iska leh ), qowmiyadda Chinese iyo qowmiyadda Indian(Tamil). Inkastoo dadka badankiisu ay yihiin Islam iyo Malay. Tira ahaan dadka Maleeshiyanka waa 27.5 million sida diiwaanglintii gu'gii 2006dii sugtay, Maleeshiya waxeey ku sugan tahay xaalad dhaqaalo xoogan... waxayna aad u soo saartaa arday tiro badan sannad kasta.

Haddaba Jaamacadaha Ardayda Reer Somaliland ka qalin jabiyeeen waxaa ugu horaysay Jaamacadda la yidhaahdo Universty Islamic Maleeshiya, oo ardayda ugu badan sannadkasta ka qalin jabiyaan, wax yaabaha ay ardaydaasi ka qalin jabiyaan waxaa ugu badan waa:

I - Bussiness Administration
- Economic ( dhaqaalaha)
- Management ( maamulka iyo maaraynta)
- Accountant(xisaabaadka)

II- IT information Technology,

III- Engineering
- -Software Engineering,
- -Civil Engineering
- -Telecomunication engineering

Intaas maaddo oo aan soo sheegnay waxay inta badan ka gaadhaan darajada Bachelor, Master qaarkoodna ,halka tiro aan badnayni ku eekaadaan Diploma.

Jaamacadda kale ee ay ardayda ugu badan dhigtaan waxaa weeyi jaamacadda la yidhaahdo University Technology of Maleeshiya oo sida magaceeda ka muuqata bixisa maadooyin u badan Engineering waxaana dhigta arday lagu qiyaasay Ilaa 50 arday oo dhamaantood ka wada yimi magaalooyinka Somaliland, halka qaar kalena ka yimaadeen Yurub si ay waxbarasho uga raadsadaan halkan,



Xamse Ibraahin & Khaalid Nac-nac iyo qaar ka tirsan ardayda ay wax wada dhigtaan

Waxaa kale oo xusid mudan in ay jirto Jaamacad la yidhaahdo Utara University Maleeshiya oo ku taalla woqooyiga dalkan Maleeshiya, magaalada ay ku taalana

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

waxaa la yidhaahdaa Kadah, waxayna u dhowdahay Xadka uu dalkani la leeyahay Taayland, waxaana dhigta arday Isku duuban oo sannadihiii u danbeeyey dhiganaayey, ardaydaas waxaa lagu qiyaasaa inay yihiin 60 arday oo xataa gudoomiya iyo gudoomiye ku xigeen leh .Gudoomiyaha ardaydaas waxaa la yidhaahda Muxayadiin Cabdi Cali Barkhad, inkastoo ay jaamacaddaasi bixin Engineering haddana ardaydaasi waxa ay dhigtaan ee ugu badan waa Information Technology iyo Business administration, halka qaarna ka dhigtaan maaddada siyaasadda ( Political Science), halka ay qaarkoodna dhigtaan  habka baananka looga shaqeeyo(Banking), waxayna isugu jiraan rag iyo dumarba,.

Sidoo kale  waxaa jirtaa Jaamacad kale oo lagu magaacabo University of International Technology iyo midkale oo layidhaahdo Multimedia University oo arday ahaan marka la isku geeyo ay dhigtaan 25 ilaa 30 arday, inkastoo ay ardaydaasi dadaal dheeraad ah muujiyaan haddana waxay ku dadaalaan sida ay himaladooda u gaadhi lahaayeen waddankan ay uga noqon lahaayeen iyaga oo aqoon leh,.

Marka haddaba laga yimaado jaamacadaha waxaa jira kuliyado(College) fara badan oo ku yaalla magaalo Ganacsiga Maleeshiya ee Kualalumpur.Kuliyadahaas ay ardaydaasi dhigtaan oo ah ilaa  5 kuliyadoodoo caalami ah ka kooban ayaa qaarkood hadda ay isku badalaan Jaamacad,.Ardaydaas kuliyadaha dhigata waxaa lagu qiyaasaa marka la qiimaynayo in ay yihiin 200 oo  Arday.Kuliyadahaas sababta ay ku doortaan waxa weeyi yagoo ay ka kooban yihiin jaamacadda xagga wakhtiga .Kuliyadahaasna waxaa ugu caansan oo ardaydu badankoodu dhigtaan Segi  College waxaana lagu wada dhawaan inay isku badali doonto jamaacad.Kuliyadaha ayaa  markii ay tayadooda wanaajiyaan dawlada Maleeshiya uu bedeshaa in ay helaan darajada jamaacad .Kuliyada Segi waxay ku taalaa magaalo ganacasiga kualalumpur ee wadanka Maleeshiya.Waxaana dhigta kuliyadaas arday reer somaliland ah oo tiradoodu ku dhawdahay 35 arday kuwaas oo badankoodu dhigtana maadooyinka business iyo accounting ah. Hadaba waxaanu la kulanay Cabdiraxman Ibrahim Ismaaciil oo ah arday sannadkiisii ugu danbeeyay ku jira ,baranayana  xisaabaadka (BA of accounting) ,



Cabdiraxmaan waxa uu noo sheegay in uu isaga takhasuskiisu yahay Accounting C/raxamaan waxaa u jecelyahay in marka uu Sannadkaasi dhamaysto uu dalkiisii hooyo ugu adeegi doono aqoonta uu halkaasi ka bartay,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan



C/raxmaan iyo Arday ay wada dhigtaa

Waxaa kaloo noo suurtogashay inaanu la kulano Diiriye Boobe Yuusuf oo ka mid ah ardayda Jaamicada –University of Technoloy Maleeshiya-.



Diiriye Boobe Yuusuf

Diiriye Boobe waa ardayda ugu cad-cad ee wax ka barta Jaamacadaa .Diiriye laftiisu waxa uu jecelyahay in haddii uu waxbarto dalkiisii hooyo kula noqon doono, oo anfaci doono wixii uu ku kordhin karana ku kordhinayo.

Gabdhaha halkan wax ka dhigtaa waa ay fara badan yihiin balse innaga oo soo koobayna, iyo waxyaabaha ay dhigtaa waxaan tusaale yar oo fiican na siisay, Ihaan Maxamed Cabdilaahi, oo ah ardayada wax ka dhigata Riima College oo ka mid ah College yada ay somalidu ku badan yihiin oo ay arday badan oo wax ka

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

dhigtayna dadlkii kula noqdeen wakhtiganna shaqooyin wacan haysta, sida qaar hadda macalimiin ka ah Jaamacadda Hargeysa oo Isla Collegkan waxa ka dhigtay,




Waxa ay tidhi Ilhaan: *waxan waddanka imi muddo saddex sanno ka hor ah imikana waxaan ku jiraa gaba-gabo oo waxaa ii hadhsan halsanno oo kaliya waxaanan dhigtaa IT information Technology, Markaan dhameeyana waxaan ku noqonayaa dalkii.* Mar ay ka hadlaysay in ay jiraan hablo kale iyo inkale waxay tidhi: *haa waa ay jiraan kaligayna maaha xataa waxaa jira Hablo hadda dalkii ku noqday oo aanu isku soo gaadhnay, balse imika college ahaan hablaha dhigtaa kuuma soo tirin karo,*

Waxaa jira hablo kale oo yaguna dalka soo galay inkastoo marka laga yimaaddo xagga ragga ay ka tiro yar –yihiin taasi oo ay ugu wacantahay hablaha oo aan badankooda waddan qurba ah lagu soo aaminayn, siday dadkeenu badankaba aaminsanyihiin, laakiin intii kale ee timid waa ay ka faa'ideen iyada oo qaar kamid ah ay la socdaan wiilal ay isla dhasheen si ay wahel ugu noqdaan,

Waxaa ka mid ah hablahaas , Saynab X, Cabdi Maxamed oo ka mid ah yadna hablaha dhigta isla Collegkan waxay tidhi Saynab: *waddankan hadda waxaan joogna hal sano oo qudha waxaanan bilaabay collegkan si aan wax uga barto kaligayna ma ahaynee waxaa ila socday walaalkay oo lagu magaacabo Maxamed, waxaanan ku tala jiraa in aan bilaabo Management walaalkayna Computer science imika waxaan dhigannaa luuqaddii aan wali ku jirno, isla luuqaddaas Englishka markaan dhamaynana waxaan u gudbaynaa Focult-gii caadiga ahaa,*

Haddaba hablahaas iyo hablo kaleba waxaa looga baahanyahay dadaal dheerad ah si ay uga faa'idaysan wakhtigooda qaaliga ah oo ay la tar-tamaan ragga,

Waxaa runtii abaal weyn ku leh dalka iyo dadka Soomaaliland Datu Bukhaari oo wadanka Maleeshiya u dhasay waana ninka dhexe ee ardayda somaliland siin jiray deeq waxbarasho (Scholarship),.Soomaaliand way gudi abaalkaa intii kartideeda siday ugu guday duuliyihii Kornayl *Axmed* Maxamed Xasan – *Axmed* Dheere - markii damiirkiisu siin waayey inuu madaafiic ku garaaco maatida Soomaliland .

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan



Datu Bukhaari  iyo ardeyda

Dhamaan waxaan u rajayanayaa ardayda Somaliland ee wax ka barata halkan iyo meelaha kale ee caalamka in ay guul kula hoyan doonaan dalkoodii hooyo,

Qore :Axmed Riiraash (ahmedrirash@hotmail.com)
Tifatirkii :  Fu,aad Sh.  (Bahda Mareegta Farshaxan)

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.